



## U wareegista fasalka 3-aad

### Barashada luqadda A2 ayaa bilaabmaysa

Dhammaan ardeyda Helsinki waxaay fursad u leeyihiin inay luqadda A2 ku bilaabaan fasalka 3-aad. Luqadda A2 waxaa lagu bartaa fasalka 1-aad waxaana la qaataa 1 saac toddobaadkii marka fasalka afaraad la gaadhana 2-3 saacadood toddobaadkii iyadoo lagu jeedinayo qaabka uu dugsigu u qaybsaday xiisadaha. Fasallada 7-9 luqadda A2 waxaa la bartaa iyadoo xiisado dheeraad ah ama xiisadaha ikhtiyaariga ah. Barashada luqadda A2 way sii soconaysaa illaa ardaygu uu ka dhamaysanayo waxbarashada aasaasiga ah.

### Waxbarista la xoojiyay ee la bilaabayo fasalka 3-aad

Fasalka saddexaad waxaa la bilaabayaa waxbaris la xoojiyay oo lagu qaadanayo maaddooyinka **farshaxanka, jimicsiga, muusiga, daansiga casriga ah** iyo **soo jeedinta suugaanta**. Ardeyga codsanaya waxbarashada la xoojiyay waa inuu ka qaybqaataa **imtixaanka doorashada** oo uu ku baasaa. Ardeyda waxaa loogu xulanayaa waxbarista sida ay ugu kala sarreeyaan buundooyinka imtixaanka doorashada.

- Ardaygu wuxuu codsan karaa **ugu badnaan shan** doorasho oo kala duwan.
- Isla imtixaankaas doorashada ayaa lagu codsan karaa dhammaan dugsiyada bixinaya waxbaristaas la xoojiyay ee gaarka ah.
- Haddii uu ardaygu codsado dugsiyo badan oo bixinaya isla waxbarista la xoojiyay, wuxuu imtixaanka doorashada ku gali kara waxbaristaas la xoojiyay dugsiya ugu horreeya ee uu kaga doortay.
- Fiiro gaar ah! **Imtixaanka doorashada si gaar ah laguuguma soo baaqayo**. Jadwalka imtixaanada la xoojiyay waxaa laga heli karaa bogagga internetka ee dugsiyada, ula soco iyaga si firfircooni leh.
- Ardeyga waxaa laga dooran karaa hal dugsi oo kaliya.
- Codsashadu way ku xanibaysaa, taas oo ay macnaheedu tahay inuu ardaygu ku khasbanyahay inuu booska qaabilo, haddii la doorto.
- Dugsiyadu waxay qabanqaabiyaan **munaasabado warbixineed** oo ku saabsan waxbarista la xoojiyay. Wakhtiyada munaasabadahaas waxaad ka arki kartaa bogga internetka ee dugsiya.

**8.–19.1. Munaasabadaha warbixinta ee dugsiyadu leeyihiin.** Ka fiiri wakhtiyada ay jiraan boggaga internetka ee dugsiyada.

**22.1.–4.2. Wakhtiga codsiga.** Ka buuxi foomka Wilma-da. Codsiyada habsaamay lama qaabilayo.

**6.–27.2. Imtixaanka doorashada.** Ka hubi jadwalka bogga internetka ee dugsiya. Baaq gaar ah lama soo dirayo.

**29.3. Go'aamada lagu sheegayo in ardeyda la qaatay waxaa guryaha loogu dirayaa boosto ahaan.** Looma baahna in si gaar ah loo xaqiijiyo booska waxbarashada.

## Hubinta baahida taageerada waxbarashada ee marka fasalka 3-aad loo wareegayo

Baahida taageero ee ardeyga waxaa si joogto ah loo qiimeynayaa muddada lagu jiro sannad-dugsiyeedka. Go'aanka baahida taageerada gaarka ah waxaa la hubinayaa mar walba kaddib marka la dhamaysto fasalka 2-aad, markaas oo go'aan laga qaadanayaa in taageerada baahida gaarka ah la sii wadayo iyo in la joojinayo. Haddii uu ardaygu u wareegayo dugsi kale marka uu fasalka 3-aad gaadho, dugsiya ardeyga diraya ayaa ka warhaynaya, in macluumaadka ardeygu u baahanyahay ee taageerada khuseeya loo wareejiyo dugsiya cusub.



## Macluumaad dheeraad ah:

- U wareegidda fasalka saddexaad: <https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/kouluun-ilmoittautuminen-ja-hakeminen/tietoa-3-luokalle-siirtyvalle>
- Barashada luqadaha ee Helsinki: <https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/opiskelu-peruskoulussa/opetussuunnitelma-oppiaineet-ja-arviointi>
- Macluumaad guud oo ku saabsan waxbarashada luqadaha: <https://www.kieliverkosto.fi/fi/tassu-tiu/huoltajalle>
- Waxbarashada la xoojiyay: <https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/kouluun-ilmoittautuminen-ja-hakeminen/painotettu-opetus-ja-perusopetusta-eri-kielilla/painotettu-opetus>
- Taageerada waxbarashada: <https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/tukea-oppimiseen-hyvinvointiin-ja-koulunkayntiin/oppimisen-tuki>
- Bogagga internetka ee dugsiyadu leeyihiin: <https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/peruskoulut>